# Kusoo dhawoow dugsiga xannaanada!



**Förskoleförvaltningen**

Göteborgs Stad

# Salaan!

Inuu ilmuhu bilaabo dugsiga xannaanada waa waqti cusub oo xiiso u leh adiga iyo ilmuhuba. Waxaan rajeyneynaa in aad ka heli doontaan oo waqtiga dugsiga xannaanadu uu noqdo mid farxad leh, ammaan ah oo wax ku ool u ah dhammaan qoyska.

Buug-yarahaan waxaan ku uruurinnay xogo iyo talooyin wanaagsan oo siin kara qoyskiina bilow wanaagsan.

Haddii aad qabtid su'aalo, waxaad had iyo jeer la hadli kartaa shaqaalaha dugsiga xannaanada ilmahaaga.

**Soo dhawoow!**

# Tusmo

**Waxbarashada iyo horumarka oo ah udub-dhexaadka**
Waajibaadka dugsiga xannaanada ........ **4**

**Marka ilmahaagu bilaabaya dugsiga xannaanada**
Sidaan buu u shaqeeyaa dugsi la-qabadsiinta ........ **6**

**Macluumaad waxtar leh**
Cuntooyinka dugsiga xannaanada ........ **8**

Mamnuucidda lawska ........ **8**

Dhar ku habboon cimilada ........ **8**

Immisa ayay ku kacaysaa booska dugsiga xannaanada? ........ **10**

Saacadaha xaddidan ee furitaanka ........ **10**

App-ka fududeeya nololmaalmeedka ........ **10**

**Haddii ilmahaagu xanuunsado** ........ **11**

**Bilow wanaagsan ka hor inta aan dugsigu bilaaban** ........ **12**

**Iskaashi loogu jiro fayow-qabka carruurta** ........ **14**

**Hab-dhiska iyo mas'uuliyadda** ........ **15**

**Xogta xiriirka** ........ **16**

# Waxbarashada iyo horumarka carruurta oo ah udub-dhexaadka

Carruurtaadu waxay ku baranayaan waxyaabo cusub dugsiga xannaanada, waxayna ku horumaraan iyadoo loo maraayo ciyaar, hal-abuur iyo wax sahamin keligood ah, koox ahaan iyo iyagoo la shaqeynayo dadka waaweyn.

Dugsiga xannaanada waxaa ku jira waxbarasho kicinaysa oo dhiirrigelinaysa carruurta. Waxbarashadu waxay ku saleysan tahay manhajka dugsiga xannaanada. Si ciyaar ciyaar ah ayaan waxaan kula qabannaa xiisaha iyo rabitaanka carruurta waxbarasho. Xiisaha iyo baahiyaha carruurta ayaa saamayn ku leh sida aan u qorshayno waxbarashada.

Waxaad ka akhrisan kartaa wixii dheeraad ah oo ku saabsan manhajka dugsiga xannaanada bogga internetka ee hay'adda waxbarashada ee Skolverket. Qorshuhu wuxuu ka kooban yahay macluumaad dheeri ah oo ku saabsan ujeedada iyo hawsha xannaanada.

## Xuquuqda siman ee dhammaan carruurta

Dhammaan carruurtu waxay xaq u leeyihiin deegaan nabdoon, oo ka madax bannaan takoorka iyo xad-gudubka. Waxaan si firfircoon uga shaqeynaa difaaca xuquuqda carruurta iyo ka hortagga nooc kasta oo xad-gudub ah.


ABBIS
JOJO
MILLE
Salaan! Waxaan ku tuseynaa dugsiga xannaanada. Nala soco!

# Marka ilmahaagu bilaabayo dugsiga xannaanada

Waqtiga dugsiga xannaanadu wuxuu ku bilaabmaa iyadoo la sameynaayo hogatus, halkaas oo adiga iyo ilmahaagu aad fursad ugu heleysaan inaad barataan shaqaalaha,dugsiga xannaanada iyo nidaamyadiisa. Inta lagu jiro hogatuska waxaad weydiin kartaa shaqaalaha su'aalo sidoo kale waxaad u sheegi kartaa baahiyaha ilmahaaga.

Kadib markii la dhammeeyo la qabadsiinta ilmaha ee dugsiga, waxaa jiri doona fursado badan oo lagula sheekeysan karo oo aad kula kulmi karto shaqaalaha dugsiga xannaanada. Waa kuwan tusaalooyinka kulamada aad naga filan karto.

» **Kulan maalinle ah** – Warbixin kooban oo ku saabsan maalinta ilmahaaga. Haddii aad rabto inaad si qoto dheer u wada hadashaan, ballan ka sameyso shaqaalaha.

» **Wadahadalka horumarka** – Waxay ku saabsan tahay laqabsashada ilmahaaga ee dugsiga, baahiyihiisa, horumarkiisa iyo waxbarashadiisa.

» **Kulamada waalidka** – Warbixin ku saabsan shaqada dugsiga xannaanada, yoolalka iyo mashaariicda hadda socda.

» **Qiimayn sanadle ah waalidiinta** – Hal mar sanadkii heli doontaa sahan (foom) su'aalo ah oo la xiriira sida aad u aragto dugsiga xannaanada. Jawaabahaaga waxay naga caawinayaan horumarinta iyo tayeynta shaqada.

Markii Abbis uu bilaabay dugsiga xannaanada, aabbihiis ayaa la joogay bilowgii. Maalin kasta waxay si wadajir ah u sudhaayeen dharka bannaanka ee Abbis meel uu leeyahay.

Abbis wuxuu jecel yahay inuu wax sawiro, wuxuuna inta badan bilowgii wax la sawiri jiray qof ka tirsan shaqaalaha. Inta uu wax sawirayo, caruurta kale ee cusub ayaa agtiisa ku ciyaarayay. In yar kadib, Abbis ayaa rabooday inuu ciyaarta ka qayb qaato.

Markii la gaaray waqtiga nasashada, Abbis wuu daalay wuuna seexday muddo yar. Markii uu dhamaaday la-qabadsiinta dugsiga, aabaha ayaa bartay shaqaalaha wuxuuna dareemay kalsooni ah in Abbis uu ku jiro meel wanaagsan oo ammaan ah.





# Macluumaad waxtar leh

## Cuntooyinka dugsiga xannaanada

Dugsiga xannaanada wuxuu carruurta siiyaa quraac, qado iyo cunto fudud maalin kasta. Cuntada waxay raacdaa talooyinka Hay'adda Cuntada Qaranka ee Iswiidhan, si carruurtu u helaan cunto nafaqo leh oo caafimaad qabta maalin kasta. Waxaan diyaarinnaa cunto leh digir, khudaar iyo miraha waafaqsan xilliyada.

**Ma u baahanyahay Carruurtada cunto gaar ah?** Markaa waa in aad kusoo gudbisid macluumaadka la xariira baahida ilmahaaga bogga: goteborg.se/matiforskolan.



## Mamnuucidda lowska

Waa ka mamnuuc gudaha dugsiga xannaanada in la keeno ama la bixiyo *lows*, *lowska dhulka ka baxa*, *laws-yicibka* iyo *sisinta*. Lawska, laws-yicibka iyo sisinta waxay keeni karaan xasaasiyad halis ah.

## Dhar ku habboon cimilada

Carruurtu waxay waqti badan ku qaataan bannaanka marka ay joogaan dugsiga xannaanada, sidaas darteed waa muhiim in ay haystaan dhar ku habboon cimilada. Waxa kale oo fiican in ilmuhu uu ku haysto dugsiga xannaanada dhar bedelesho ama dhar dheeraad ah si haddii uu qoyo ama wasakhoobo, uu weli u dareemo raaxo.

**Fadlan ku calaamadee dharka ilmaha magaca.**

Jojo wuxuu jecel yahay cuntada. Dugsiga xannaanada, Jojo wuu cunaa dhammaan cuntooyinka la bixiyo. Shaqaaluhu waxay arkaan in carruurta kale ay dhiirran yihiin in ay tijaabiyaan cuntooyin cusub marka Jojo uu la joogo. Qof ayaa markii ugu horreysay borokoli tijaabinaya, qof kalena wuxuu qaadanayaa maraq dheeraad ah. Jojo horay ayuu u dhammeeyay cuntadiisa.

In cuntada si wadajir ah loo cuno waa muhiim dugsiga xannaanada. Shaqaalaha iyo carruurtu waxay cuntada inta ay cunayaan ka wada hadlaan waxyaabo kala duwan. Maxay tahay qaab dhismeedka baradhada? Yaa hadda leh qaadashada digirta? Cuntada waxay noqotaa fursad lagu barto afka iyo xisaabta. Sidoo kale in lagu noqdo saaxiib wanaagsan, xitaa marka la cunayo.



## Immisa ayay ku kacaysaa booska dugsiga xannaanada?

Bil kasta waxaad bixinaysaa lacag ku saabsan booska uu ilmahaagu ka heysto dugsiga xannaanada. Lacagtaas waxay ku xiran tahay dakhliga guud ee canshuurta laga qaado ee qoyskaaga. Xitaa lammaanaha aan ahayn waalidka mas'uulka ah ayaa lagu daraa marka la xisaabinaayo dakhliga guud ee qoyska.

Adiga ayaa mas'uul ka ah in aad bixiso xogta saxda ah, waxaana muhiim ah in aad wargeliso sida ugu dhakhsaha badan haddii ay is beddelaan dakhliga qoyska, shaqada ama haddii aad kala guurtaan ama wada degtaan. Haddii qoyska aanu lahayn wax dakhli ah oo canshuuri ku waajibto, fadlan geli 0 (eber) marka aad buuxineyo xogta dakhligiina.

Wixii macluumaad dheeraad ah waxaad ka heli kartaa bogga goteborg.se/forskoleavgift.

## Saacadaha xaddidan ee furitaanka

Xilliga xagaaga, xarumo badan oo dugsiyada xannaanada ah waa la xiraa. Haddii ilmahaagu u baahan yahay dugsi xannaano inta lagu jiro waqtigaas, waxaa jira xarumo xannaano ah oo xagaaga furan.

Afar jeer sanadkii, dugsiga xannaanada wuxuu leeyahay maalmo waxbarasho oo shaqaalaha ah. Maalmahaas, dugsiga xannaanada wuu xiran yahay, ilmahaaguna waa fasax. Haddii aadan heli karin fasax maalmahaas, ilmahaaga waxaa lagu hayn karaa dugsi xannaano oo furan, xitaa maalmaha waxbarashada shaqaalaha.

Waxaad ka heli kartaa xogta ku saabsan fasaxyada iyo maalmaha waxbarashada ee hadda jira bogga goteborg.se/forskola.

## App-ka fududeeya nololmaalmeedka

### App-ka Unikum Familj

App-ka Unikum Familj waxaad si toos ah ugala socon kartaa taleefoonkaaga gacanta nololmaalmeedka, horumarka iyo waxbarashada ilmahaaga ee dugsiga xannaanada. Waxaad sidoo kale ka helaysaa farriimo ku saabsan waxa ka socda dugsiga xannaanada iyo macluumaad kale oo muhiim ah oo aad u baahan tahay in aad ogaato.

Soo dejiso app-ka Unikum Familj, adigoo adeegsanaya app-Store-ka ama Google Play ama gal bogga start.unikum.net.

### App-ka IST Home Skola

Ku buuxi waqtiga ilmahaaga uu joogayo dugsiga xannaanada adigoo adeegsanaya app-ka IST Home Skola. Waqtiga aad buuxinayso waa inuu ku salaysnaadaa waqtiga aad shaqaynayso, shaqo raadsanayso ama aad fasax waalidnimo ku jirto (oo ay ku jirto waqtiga safarka).

Waqtiga carruurta lagu qoray ayaa go'aaminaaya marka xarunta la furayo ama la xiraayo, iyo goorta shaqaaluhu shaqeynayaan. Haddii aad u baahan tahay in aad beddesho waqtiga, waa in aad ku samaysaa isbeddelka app-ka ugu yaraan laba toddobaad ka hor.

Haddii aadan awoodin in aad isticmaasho app-ka, waxaad xarunta ugu gudbin kartaa farriin qoraal ah. Isbeddelada kumeelgaarka ah waxaad samayn kartaa hal maalin (24 saacadood) ka hor. Marka aad fasax tahay, ilmahaaguna fasax ayuu noqonayaa.

# Haddii ilmahaagu xanuunsado

Ilmahaagu waa inuu caafimaad qabo si uu u awoodo inuu ciyaaro oona ka qayb qaato hawlaha dugsiga xannaanada. Marka uu ilmahaagu xanuunsado, waa in aad la soo xiriirtaa dugsiga xannaanada sida ugu dhakhsaha badan. Wac ama u dir fariin qaybta uu ilmuhu joogo, sidoo kale waa inaad ka diiwaangelisaa maqnaanshaha app-ka IST Home Skola.

## Goorma ayay tahay in ilmahaagu guriga joogo?

- Haddii shaqaaluhu ay arkaan in ilmaha uu aad u daalan yahay ama uusan awoodin inuu ka qayb galo hawlaha dugsiga xannaanada.
- Haddii ay hayso qandho – ilmaha waa inuu noqdo qandho la'aan ugu yaraan 24 saacadood ka hor inta aan la soo celin.
- Haddii uu qabo cudur faafa.
- Haddii uu leeyahay nabar dhacaan leh ama cambaar – ilmaha wuu soo laaban karaa marka nabarradu qalalaan.
- Haddii uu qabo shuban, matag ama calool xanuun – ilmaha waa inuu si caadi ah u cunaa oo aanu lahayn calaamado ugu yaraan 48 saacadood ka hor inta aan la keenin.
- Fadlan noo soo sheeg marka ilmahaagu ku soo laabanayo dugsiga xannaanada si aan u qorsheyno in shaqaalo ku filan u joogaan goobta.

*Maamulka dugsiyada xannaanada wuxuu raacaaa habraacyada nadaafadda ee gobolka Västra Götaland.*



# Bilow wanaagsan ka hor inta aan dugsigu bilaaban

Cilmi-baaris ayaa muujinaysa in waxbarashada lagu helo dugsiga xannaanada ay door weyn ka ciyaarto horumarka carruurta marka ay bilaabayaan dugsiga. Carruurtu waxay xirfadooda ku horumariyaan, gaar ahaan luqadda, iyagoo ku sugan deegaan ciyaar leh oo dhiirrigelinaya barashada.

Daraasado ayaa muujinaya in carruurta dhigatay dugsiga xannaanada ay leeyihiin horumar dhanka luqadda iyo xisaabta marka ay bilaabayaan dugsiga.

**Dugsiga xannaanada, carruurtu waxa ay baranayaan waxaa kamid ah:**

» **iskaashi la yeelashaan dadka kale**

» **xallinta dhibaatooyinka**

» **la wadaagidda waxyaabaha ay haystaan dadka kale**

**Akhrisku wuxuu horumariyaa mala-awaalka carruurta iyo eray-bixintooda.**

Mille wuxuu ag maraa dhismo cusub isagoo ku sii jeeda dugsiga xannaanada. Waxaa laga dhisayaa hool ciyaareed cusub. Mille wuxuu u arkaa arrin xiiso leh, waayo waxaa halkaas yaalla waxyaabo badan oo la daawado. Intii lagu guda jiray kulanka carruurta, Mille wuxuu u sheegay saaxiibadiis macluumaad ku saabsan mashiinnada qoda dhulka.

Maalinta xigta, dugsiga xannaanada wuxuu carruurta u kaxeeyay meelaha dhismuhu ka socdo si dhammaan ay u arkaan waxa ka socda halkaas. Markii ay ku soo noqdeen dugsiga xannaanada, Mille iyo dhowr saaxiib ayaa dhisme u gaar ah ka dhisay barxadda dugsiga xannaanada.



# Iskaashi loogu jiro fayow-qabka carruurta

Carruur kasta waa inay helaan fursad ay ku horumaraan kuna dareemaan wanaag marka ay joogaan dugsiga xannaanada. Maamulka dugsiga xannaanada waxaa ka shaqeeya macallimiinta taqasuska leh, khubarada hadalka iyo luqadda iyo cilmi-nafsi-yaqaanno, waxaana sidoo kale iskaashi la leenahay xarunta caafimaadka carruurta (BVC), xafiiska adeegga bulshada iyo hay'adaha kale ee xariirka la leh qoysaska.

## Taageero loo fidiyo qoyska

Ma dooneysaa inaad xoojiso xiriirka aad la leedahay ilmahaaga ama aad hesho taageero waalidnimo?

Kulammada ABC iyo koorsooyin kale waxay bixiyaan talooyin, isku-duubni iyo hagid — si dijitaal ah ama goob joog ah.

Kasii akhri wax badan oo ku saabsan waxa ka jira agagaarkaaga bogga goteborg.se/foraldrastod.

Mararka qaar qoysaska iyo carruurtu waxay u baahan yihiin taageero dheeraad ah, tusaale ahaan marka la eego horumarka ilmaha ama caafimaadkiisa. Haddii ilmahaagu helo taageero kala duwan oo ka kala timaada hay'ado badan, waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedihiin qorshe isku-dhafan ee gaarka ah ee SIP (qorshaha isku dhafan ee gaarka ah). Weydii maamulaha dugsiga xannaanada.

## Dugsiga xannaanada waxaa ka jira waajibka sir-xejinta

Dhammaan shaqaalaha ka shaqeeya dugsiga xannaanada waxay leeyihiin waajib ah in ay xogta qoysaska iyo carruurta xejiyaan oo ay ilaaliyaan, mana la wadaagi karaan macluumaad shaqsi ah cid aan shaqada la xiriirin.

## Dhammaan carruurta waxay ku jiraan caymis

Dhammaan carruurta ku sugan dugsiga xannaanada eena ka diiwaangashan magaalada Göteborg waxay kujiraan caymis shileed, waqti kasta, 24 saacadood maalintii. Caymisku wuxuu kaliya khuseeyaa shilalka. Kasii akhri wixii dheeraad ah oo ku saabsan caymiska carruurta iyo ardayda bogga goteborg.se/forskola.

# Hab-dhiska iyo mas'uuliyadda

Maamulka dugsiyada xannaanada ayaa mas'uul ka ah ku dhawaad 20 xarumo xannaano oo furan, ku dhawaad 360 dugsiyo xannaano oo degmada leedahay, looguna talo galay qiyaastii 25,000 carruur ah oo ku sugan magaalada Göteborg.

Dugsiga xannaanada waxaa ka shaqeeya shaqaale leh xirfado kala duwan kuwaas oo iska kaashanaya in carruurtu helaan nolol maalmeed farxad leh, ammaan ah, isla markaana waxbarasho leh.

**Maamulaha** ayaa leh mas'uuliyadda guud wuxuuna hubiyaa in waxqabadku si habboon u shaqeeyo. **Macallinka dugsiga xannaanada** ayaa mas'uul ka ah in waxbarashadu la jaanqaado manhajka waxbarashada iyo in waxyaabaha la barayo ay noqdaan kuwo qaab gudbineed waxbarasho leh. Labada **macallimiinta dugsiga xannaanada** iyo daryeelayaasha carruurta waxay carruurta ka taageeraan waxbarashadooda iyo horumarkooda.

Waxaad ka akhriyi kartaa wixii dheeraad ah oo ku saabsan hab-dhiska iyo goobta shaqada ee maamulka dugsiga xannaanada ee Magaalada Göteborg bogga goteborg.se/forskoleforvaltningen.







# Ma qabtaa su'aalo?

La xiriir adeega dugsiga xannaanada adigoo booqanaya
**goteborg.se/forskoleservice**

Waqtiyada taleefanka Isniin–Jimce
saacadda 8–16.30
**Taleefan:** 031-365 09 60

**Xarunta xiriirka ee Göteborg Stad**
Halkaan waxaad ka heli kartaa caawimo luqado kala duwan ah.
Taleefan: 031-365 00 00

Bogga goteborg.se/forskola waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dugsiyada xannaanada ee ku yaal Göteborg, sidoo kale waxaad ka dhiiban kartaa ra'yigaaga ama talooyin ku saabsan dugsiga xannaanada.

**La soco maamulka dugsiyada xannaanada ee dhinaca Facebook iyo LinkedIn si aad ula socoto wararka iyo waxyaabaha ka dhacaya dugsiyada xannaanada ee Magaalada Göteborg.**



Göteborgs Stad 250320-003-608 Tryck: Ale Tryckteam AB Maj 2025